

## 1.2 Ma U Baahan Doontaa Caawimo Si Aad Ula Raadiso Ilmahaaga Dhalinta Yar Nadaamka Waxbarashada?

### Muxuu bixiyaa adeega Faragelinta Hore ee Carruurnimadu?

Adeega Faragelinta ilmanimada hore waxaa la siiyaa carruurta yaryar oo qaba iin aad u weyn (da'da eber ilaa da'da dugsiga). Waxayna ka caawimaan qoyska xirfadaha waxayna ka kaalmeeyaan inay ka qaybgalaan noloshu bulshada.

La xiriir Wasaarada Waxbarashada iyo Koritaanka Ilmanimada Hore si loo hello macluumaad intaas ka badan haddii aad ku nooshahay xaafadaha Galbeedka wac 9275 7500 haddii aad ku nooshahay xaafadaha Waqooyigana wac 94790121.

Haddii ilmahaagu tago xarunta faragelinta ilmanimada hore shaqaale aqoon leh ayaa kaa caawin kara inaad u gudubto dugsiga hoose. Waxay awoodaan inay la shaqeeyaan dugsiga si ay u xaqiijiyaan in ilmahaaga baahidiisa la fahmay.

Haddii ilmahaagu aanu helin Adeega Faragelinta Ilmanimada Hore la xiriir golaha degmada weydiina Sarkaalka barnaamijka dugsiga ka hor kaas oo awoodi doona inuu ka caawimo kindergarten-ka ilmahaaga baahidiisa gaarka ah. Waxaa laga yaabaa inaad fiiriso xaashida macluumaadka 4.7 oo kitkaan 'sidee ula xiriirayaa golahayga degmada'.

### Shaki ma ka qabtaa dugsigaad dooran lahayd?

Ilmahaagu wuxuu tegi karaa dugsi dawladeed ama mid aan dawli ahayn. Waxaa kaloo laga yaabaa inay xaq u leeyihiin dugsi khaasa ama dugsiga korinta khaaska ah.

Waxaad ka heli kartaa dhowr xal oo kala duwan meelaha aad ku nooshahay, in kastoo doorashada dugsiga gaarka ah ee korintu ku xiran yahay qiimaynta. Waxaad awoodaa inaad hubiso ku haboonaanta dugsiga ka hor inta aadan ku qorin. Wac maamulaha dugsiga si aad u samaysato waqti aad booqato. Waxay noqon kartaa wax muhiima inaad qorto dhowr su'aalood oo aad doonayso inaad weydiiso dugsiga. Kuwaa waxaa ku jiri kara:

**Maxaa dugsigani bixiyaa oo kuwa kale aanay bixin? Ardada fasalada ku jirta intee dhan yihiin? Side lagu geli karaa tas-hiilaadka? Side shaqaaluhu wax uga qabanayaan baahida ilmahaaga? Maxaa kaalmo dabiici ku daaweyn ah oo la helli karaa? Ma ku taallin soonaha basku maro\*\*? (\*\*Khaaska iyo dugsiyada horumarinta)**

Macluumaad siyaada ah, ee kaalmada iyo talada xagga xulashada ilmahaaga la xiriir hay'ada Association for Children with a Disability tel: 9818 2000.

### Ma dalbanaysaa Barnaamijka Carruurta iinta leh?

Carruurta iinta leh qaarkood ayaa xaq u yeellan doona inay ku hellaan dugsigooda kharaj barnaamijka Ardada Iinta leh. Si kasta ha ahaatee, waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto dugsiga ugu yaraan 6 bilood ka hor inta aadan isku qorin si aad dalab u samayso.

Haddii aad xaq u leedahay, lacagta dugsiyada kaa qaadayo waa isbedelaysaa. Hadda, dugsiyada dadweynaha waxay hellaan kharaj badan marka loo fiiriyo dugsiyada gaarka ah, laakiin dugsiyada gaarka ahi waxaa laga yaabaa inay leeyihiin gargaar dugsiga dhexdiisa ah iyo kaalmo aad helli kartid.

### Ma jirtaa wax caawima gaadiid ah oo la helli karo si ilmahaaga loo qaado?

Haddii ilmahaagu aado dugsi khaasa ama dugsiga horumarinta waxaa laga yaabaa inuu xaq u leeyahay kaalmo gaadiid. Waa in aad ku nooshahay meelaha la magacaabay si dugsi loogu hello caawimo. Macluumaad intaas ka badan la hadal dugsiga ilmahaagu dhigto.

Wasaarada Waxbarashada iyo Horumarka ilmanimada Hore wuxuu bixiyaa Gunada ardada kuwaas oo isticmaala kuraasta lagu socdo si taksi loogu raaco dugsiga ugu dhow. Wac 9637 311 macluumaad intaas ka badan.